



Ilaahay kama Dulmiyo muuminka Xasano Aduunka wuu ku siiyaa Aakhirona

Anas Binu Maalik Allaah ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaah siiyee wuxuu yiri: Ilaahay kama Dulmiyo muuminka Xasano Aduunka wuu ku siiyaa Aakhirona wuu ku abaal mariyaa, Gaalkase xasanaadkii uu Aduunka Ilaahay darti ugu sameeyey ayaa lagu quudin intuu joogo Aduunka, markuu Aakhiro yimaadna mahelaayo Xasano lagu abaal mariyo.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaah siiyee wuxuu cadeeyey waynida fadliga Ilaahay siiyey muuminka, iyo cadaalada uu u sameeyey Gaalada. Muuminka laga nusqaamiyo ajar Xasano uu sameeyey, balse Aduunka waxaa lagu siin ajarka daacadiisa, iyado Ilaahay u kaydinaayo ajarka lagu abaal marindoон aakhiro, waxaana dhici karta in aakhiro loogu keydiyo ajarka oo dhan . Gaalkase Ilaahay wuxuu Aduunka ku siinayaajarka Xasanaadkii uu Aduunka ku sameeyey, markuu Aakhiro yimaadana ma helaayo ajar lagu abaal mariyo, waayo Camalka wanaagsan ee Qofka anfacaya labada daarood waa inuu Qofku Muumin yahay.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65015>